Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

# OFFICIAL BULLETIN

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 13aad** **Muqdisho, 01 August 2026** **Lr.3**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

## BILAHA

## March-July

# 2026

**SHARCI LR.53** **TAARIIKH: 14-TA FEBRAAYO 2026**

**AXDIGA URUR GOBOLEEDKA HORUMARINTA - IGAD**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 82aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/0828/B11/26**, ku taariikheysan **11/02/2026**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Axdiga Urur Goboleedka Horumarinta - IGAD.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la meel mariyo Axdigan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Axdigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Axdiga Urur Goboleedka Horumarinta - **IGAD**.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu Axdigan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee **J.F.S.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS
DIIWAAN NO 040-2026
TAARIIKH 23/7-2026
SAXIIX
M.ne Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
DIYID / SENT
13 JUL 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

**Madaxweynaha J. F.S.**

001485

# HESHIISKA
# LAGU DHISAY
# URUR GOBOLEEDKA
# HORUMARINTA
# (IGAD)

# HESHIISKA

# LAGU DHISAY

# URURKA GOBOLEEDKA

# HORUMARINTA

# (IGAD)

# GOGOLDHIG

**Annagoo ah, Madaxweyneyaasha iyo Madaxda Xukuumadaha dalalka Urur Goboleedka IGAD,**

**DIB U EEGEYNA** Baaqii lagu gaaray Addis Ababa, Ethiopia 18-kii Abriil 1995, kaasoo dhigayey baahida loo qabo in la ballaariyo iskaashiga dalalka xubnaha ka ah, iyagoo ku wada shaqaynaya kobcinta iyo xoojinta Maamulka Urur Goboleedka Maaraynta Abaaraha iyo Horumarinta (IGADD).

**DIB U XAQIIJINAYNA** ujeedooyinka heshiiska lagu aasaasay IGAD oo la saxiixay 1996-dii iyo annagoo siinay tixgelin fulintiisa;

**DHIIRI-GELINAYNA** ujeedooyinka sharfoon ee taabbo-gelinta nabadda iyo amniga, iskaashiga goboleed, is dhex galka iyo horumar waara;

**DHIIRI-GELIN KASII DHIGANAYNA** ujeedooyinka ay xambaarsan tahay Heshiiska lagu Dhisay Bulshada Dhaqaalaha Afrika (Heshiiskii Abuja) iyo iyadoo la waafajinayo xeerarka Qodobka 28(1) ee Heshiiska aan soo sheegtay iyo Qodobka 1(t) ee Heshiiska lagu dhisay Agaagagga Gancsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika ee loo soo gaabiyo (AfCFTA);

**DIB U MILICSANAYNA** in IGAD, oo ah mid kamid ah Bulshooyinka Dhaqaale Goboleedka (RECs) ee ka tirsan Midowga Afrika, kana mid ah saxiixayaasha Habraacii 1998 ee ahaa Xiriirka ka dhexeeya iyo Bulshada Dhaqaalaha Afrika iyo RECs iyo Habraacyada 2020 ee ku saabsan Xiriirada ka dhexeeya Midowa Afrika iyo Bulshooyinka Dhaqaale Goboleedka;

**NA HAGAYO** Xeerka Dastuuri ah ee Midowga Afrika ee 2000 iyo mabaadiidiisa ku qotonta nabadgelyada, baraahaha iyo is dhexgalka Afrika;

**NA SII HAGAYAAN** Axdiga Qaramada Midoobay ee 1945 iyo iyadoo la waafajinayo ujeedooyinka iyo mabaadii'da lagu dammaanay qaaday Axdiga,

**NAGA GO'ANTAHAY** in lagu dhaqaaqo suuratalinta iskaashi dhamaystiran oo ku qotoma sinnaan iyo dheef-wadaaga taasoo looga gol leeyahay in lagu xaqiijiyo nabad, baraare iyo is dhex gal gobol;

**GARAWSAN** baahida loo qabo dedaallo wadajira ee looga hortegayo abaarta iyo curinta u adkaysiga xaaladaha ka dhasha saamaynta cimilada iyo arrimaha kale ee aafooyinka dhaqaale, deegaan ama kuwa aadanuhu sameeyaan;

**DOONAYNA** in la dardargaliyo ganacsiga, maalgashiga, iskaashiga horumarinta dhaqaalaha iyo bulshada ee ka dhaxeeya Dalalka Xubnaha ka ah iyadoo hoos loo dhigayo caqabadaha ganacsiga iyo dhaqaalaha; sameynta suuq ballaaran oo leh fursado badan iyo dhaqaale wayn oo miisaan leh;

**KU KALSOON** in balaarinta waajibaadka IGAD, ay xoojinayso iskaashiga, una adeegaysa in la dhiso tiir muhiim u ah horusocodka is-dhex galka dhaqaale ee gobolka iyo taageeridda horumar dhaqaale oo waara;

**OGSOON** heerarka kala duwan ee horumarka ka dhaxeeya Dowladaha Xubnaha ka ah IGAD iyo baahida loo qabo debecsanaan, daadejin iyo is-kabidda.

**MAANKA KU HAYNA** caqabadaha balaaran oo isku mid ah oo hadda iyo mustaqbalka taagan iyo isku-tiirsanaanta dalalkeenna iyo sidoo kale is-kaabidda khayraadkeena

**KU BARAARUGSAN** in dib u eegis lagu sameeyo Heshiiska lagu Dhisay IGAD, marka lagu daro, in ay ka dhalanayso baahida loo qabo in IGAD ay la jaan-qaaddo isbeddelada ka socda gudaha iyo dibadda iyo dib u habaynta Midowga Afria;

**GARWAAQSAN** baahida loo qabo in la xoojiyo Xog-haynta Fulinta oo la siiyo awood iyo dhaqaale ku filan, iyo

**NAGA GO'ANTAHAY** inaan ku beddelno Heshiiskii lagu Aasaasay IGAD taariikhdu markay ahayd 21 Maarso 1996, laguna bedelayo Heshiiskan,

Waxaan isku raacnay qodobadan soo socda;

## CUTUBKA KOOWAAD: QEEXIDDA UJEEDOOYINKA, HIIGSIGA, QAWAANIINTA IYO XUBINNIMADA IGAD

### Qodobka 1 Qeexid

Heshiiskan ayaa lagu dhaqmayaa, haddii aan loo baahan faahfaahin kale oo dheeraad ah;

**"Heshiiska"** waxaa loola jeedaa Heshiiska bedelaya Heshiiskii ay horay u gaareen Urur Goboleedka Horumarinta ee IGAD oo ku taariikhaysan 21-kii Maarso 1996

**"Heshiiska Abuja"** waxaa loola jeedaa Heshiiskii Dhaqaalaha Bulshada Afrika ee la gaaray 1991;

**"AfCFTA"** waxaa loola jeedaa Heshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Afrika;

**"Heshiis"** waxaa loola jeedaa Heshiiska ay gaareen Urur Goboleedka Horumarinta IGAD ee dhaqan galay 21 March 1996;

**"Shirweynaha Guud "** waxaa loola jeedaa shirka guud ee ay Madaxda IGAD isugu yimaadaan kaasoo lagu qeexay Qodobka 10-aad ee Heshiiska;

**"Guddiga danjirayasha"** waxaa loola jeedaa gudiga danjireyasha ee ka socda dalalka heshiiska gaaray ee ku cad qodobka 10 ee Heshiiska;

**"Guddiga Xeeldheerayaasha"** waxaa loola jeedaa xubnaha xeeldheerayaasha oo ka kooban xeeldheerayaal shaqada xiriir laleh oo ka socda Dowladaha xubnaha ka ah kuwaasoo bixinaya taageero farsamo oo ay siinayaan unugyada kala duwan ee IGAD**;**

**"Golaha"** waxaa loola jeedaa Golaha Wasiirada ee lagu dhisay Qodobka 10-aad ee Heshiiska**;**

**"Ku-xigeennada Xoghayaha Fulinta"** waxaa loola jeedaa saraakiisha lagu magacaabay si waafaqsan Qodobka 22-aad ee Heshiiska;

**"Xoghayaha Fulinta"** waxaa loola jeedaa Madaxa Xoghaynta Fulinta ee IGAD ee lagu magacaabay si waafaqsan Qodobka 21-aad ee Heshiiska;

**"IGAD"** waxaa loola jeedaa Urur Goboleedka Horumarinta (Intergovernmental Authority on Development);

**"Gobolka IGAD"** waxaa loola jeedaa gobolka juquraafi ahaan ay ku yaalaan Dalalka Xubnaha ka ah IGAD;

**"Dalka Xubinta ka ah"** waxaa loola jedaa dalka lagu tilmaamay Qodobka 8-aad ee Heshiiska;

**"Habraac"** waxaa loola jeedaa heshiis kasta oo kaabayo, dhaqangelinayo, wax ka bedelayo ama u qalma inuu lamid noqdo Heshiiska si waafaqsan Qodobka 56-aad ee Heshiiska**;**

**"Xoghaynta "** waxaa loola jeedaa Xog-haynta IGAD ee lagu dhisay sharciga ku cad qodobka 10-aad ee Heshiiska;

**"Gole Hawl-cayiman"** waxa loola jeedaa gole wasiiro ah oo ka socda Dawladaha Xubnaha ka ah oo hawl cayiman ay u wakiisheen Golaha Wasiirada taaso ka dhalatay arrimo taabanay Hehiiskan hadba sida Goluhu uu go'aamiyaan.

## Qodobka 2
## Ujeedka Heshiiska

Ujeedka Heshiiska waa in uu beddelo Heshiiskii lagu Dhisay Maamulka Horumarinta Urur Goboleedka taariikhdu markay ahayd 21-kii Maarso 1996, si loo ballaariyo, loona helo iskaashi qoto dheer si loo gaaro horumar waara.

## Qodobka 3
## Ujeedooyinka iyo Yoolalka IGAD

Ujeedooyinka iyo yoolalka IGAD wuxuu noqon doonaa in la dardargeliyo dhaqaalaha gobolka, arrimaha bulshada, deegaanka iyo is dhexgalka siyaasadeed iyo iskaashiga ka dhaxeeya ee xuduudaha Dalalka Xubnaha ka ah.

### Qodobka 4
### Mabaadii'da Aasaasiga ee lagu Maamulayo IGAD

Mabaadii'da aasaasiga ah ee lagu hagi doono sidii looga guul gaari lahaa ujeedooyinka iyo yoolalka IGAD ee Dalalka Xubnaha ka ah waxaa ka mid noqon doona:

**(a)** Gobonnimo siman oo ay leeyihiin Dalalka Xubnaha ka ahi

(b) nabad ku wada noolaasho, deris wanaag, in aan arrimaha gudaha ee Dalalka Xubnaha ka ah aan la faragelin karin arrimahooda gudaha iyo in hab nabadeed lagu xalliyo khilaafyada gudaha dalka iyo kuwa dalalka dhex mara iyadoo loo marayo wada hadal;

**(c)** joogtaynta nabadd gobolka, xasilloonida iyo amniga;

(d) in si siman oo wadaag ah oo loo qeybsado dheefaha ku yimaada iskaahsiga ku xusan Heshiiska.

(e) dowlad wanaag oo ay ku jirto u hogaansamidda mabaadii'da dastuuriga ah, dimoqraadiyadda, u hogaansamidda sharciga, isla xisaabtanka, hufnaanta, cadaaladda bulsho, fursado loo siman yahay, sinaanta xuquuqda raga iyo dumarka sidoo kalena Aqoonsiga, Kor u qaadista iyo dhawrista xuquuqda aadanaha iyo dadyowga.

## Qodobka 5
## Xeerarka hawleed ee IGAD

Mabaadii'da lagu maamuli doono ee ay tahay kuwa si muuqata looga miro-dhalin karo kuwaasoo ka turjumaya ujeedooyinka IGAD waxaa ka mid noqon doona;

(a) is aaminid, ka go'naasho siyaasadeed oo dhammaan Dowladaha Xubnaha ah;

(b) In helaan Dowladaha Xubnaha ka ah jawi ku filan, kuna habboon oo u suurtagalinaya siyaasado waxtar leh iyo kaabeyaasha aasaasiga ah;

(c) Mabda'a hoos u daadejinta oo adkeynaya ka qaybgalka baahsan iyo ku lug lahaansho ballaaran oo ay leeyihiin saamileyda marka loo eego hannaanka is dhexgalka, taasoo ay ka mid tahay iskaashiga isu gudubka xuduudaha, ka qayb galka bulshada iyo hannaanka hoos kasoo dhisidda;

(d) Mabda'a dabacsanaanta iyo joomitirka doorsooma kaasoo suurtagelinaya horumar laga sameeyo iskaashi IGAD dhexdeeda ah oo la xiriira heerarka is dhexgalka dhinacyada kala duwan iyo hannaan aan isku waqti ahayn.

(e) Wax-qeybi siman oo dhinaca dheefta ah kuwaasoo ka dhasha ama laga soo dhiraandhiriyo hawlaha ay IGAD qabanayso;

(f) Mabda'a kala gedisnaanta iyo is-dhammeystirka ; iyo

(g) Mabaadi'da asymmetry iyo dhammaystirka; iyo

(h) Iskaashi ku saleysan karaanka dadka iyo suuqa.

## Qodobka 6
## Masuuliyadda guud ee fulinta

**1.** Dowladaha xubnaha ka ahi waxay:

(a) Qorshayn iyo waafajin ku sameynayaan siyaasadahooda iyo khayraadkooda iyadoo maskaxda lagu hayo in la abuuro jawi ku habboon in lagu xaqiijiyo ujeedooyinka IGAD iyo dhaqangelinta qodobada ku xusan Heshiiska;

(b) isku dubaridka, iyadoo loo marayo unugyada IGD iyo siyaasadahooda ilaa xad inta ay suurtagal tahay si loo xaqiijiyo ujeedooyinka IGAD;

(c) kormeerka iyo qiimaynta fulinta Heshiiska, siyaasadaha iyo barnaamijyada;

2. Dal kasta oo ka mid ah Xubnaha wuxuu qaadayaa talaabooyinka lagama maarmaanka ah, oo ay ku jiraan meel marinta sharciyada, si hannaan hufan loogu dhaqangeliyo Heshiiska;

## Qodobka Article 7
## Hawlaha Gaarka ah ee la Qabanayo

1. Si loo xaqiijiyo ujeedooyinka iyo ahdaafta IGAD sida ku cad qodobada Heshiiska iyo hab raacyada lagu lifaaqay, Dalalka Xubnaha ka ah waxay;

(a) si adag ugu hoggaansamayaan waajibaadka saaran iyaga ee ka dhasha Heshiiska;

(b) in ay mabaadii;da ku xusan Heshiiska Abuja ku dhaqmayaan

2. Dalalka Xubnaha ka ah waxa kale oo dheeri ah oo laga rabaa inay ka shaqeeyaan;

(a) kobcinta iskaashi si loo fududeeyo wax soo saarka iyo ganacsiga badeecadaha iyo adeegyada;

(b) kobcinta iskaashi si meesha looga saaro caqabadaha horyaalla xorriyada isu socdka dadka, shaqaalaha, badeecadaha iyo adeegyada, si waafaqsan sharciyada heer qaran ee dalalka;

(c) bixinta adeegyad ku habboon iyo jawi fududaynaya sidii ganacsiyad gaarka loo leeyahay uga qayb geli lahaayeen horumarinta dhaqaalaha iyo iskaashiga ee u dhaxeeya dalalka IGAD;

(d) Abuurista jawi suuragalinaya maalgashi, xasilloon oo ammaan ah;

(e) Isku dhafka siyaasadaha dhaqaale wayn iyo iskaashiga ee arrimaha lacagta iyo maaliyadda;

(f) Sare u qaadista iyo joogtaynta jawi lagu hawl geli karo oo ah mid nabdoon oo amni ah, iyadoo loo marayo iskaashi iyo wadatashi laga yeesho arrimaha la xiriira dastuuriyadda, dimuqoraadiyadda, xuquuqda aadanaha iyo dadka, ku dhaqanka sharciga, isla xisaabtanka, hufnaanta, maamulka, amniga iyo nabadda;

(g) Xal u helista maamulka khayraadka dabiiciga iyo deegaanka iyadoo ay la socoto ka hortagidda, maamulid wanaagsan iyo garnaqa muranada iyo khilaafyada u dhexeeya dalalka xubnaha ah iyo guud ahaan gobolka;

(h) xoojinta iskaashiga lagu dhisayo mu'asasaadka ah si kor loogu qaado u adkaysiga abaaraha iyo haqab beelka cuntada.

(i) In si wadajir ah loo qaado tallaabooyinka suurto galka ee lagu gaarayo ujeedooyinka iyo yoolasha IGAD.

## Qodobka 8
## Xubinnimada IGAD

**1.** Dowladah Xubnaha ka ah Urur Goboleedka IGAD waa Jamhuuriyadda Jabuuti, Jamhuuriyadda Federaalka Dimuqraadiga Itoobiya, Dowladda Eretria, Jamhuuriyadda Kenya, Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Jamhuuriyadda Koonfur Suudaan, Jamhuuriyadda Suudaan iyo Jamhuuriydda Uganda iyo dowladii kale ee laga ogolaado in ay xubin ka noqoto.

2. Dowladaha xubnaha ka aha waxay, go'aamada u gaarayaan wadar ogol, markay noqoto shuruudo iyo arrimo ay tahay in ay go'aan ka gaarayaan, haddii la ogolaanayo Dowlad Afrika ka mid ah taasoo buuxiso shuruudaha ku qoran Jumladda 3aad ee Qodobkan.

3. Arrimaha ay tahay in ay xil iska saaraan Dowladha Xubnaha ka ah markay noqoto in ay aqbalaan dal in uu ka mid noqdo xubnaha IGAD, waxaa kamid ah waxyaabahan soo socda;

(a) aqbalidda mabaadii'da iyo ujeedooyinka IGAD ee lagu caddeeyay Heshiiskan**;**

(b) u hogaansamidda xeerarka iyo ujeedooyinka dowlad wanaagga, dimuqoraadiyadda, ku dhaqanka sharciga iyo ku dhaqanka cadaaladda bulshada iyo xuquuqda aadanaha;

(c) La-haanshaha ixtimaal sare oo ay wax ku kordhinayso xoojinta iskaashiga dhaqaale iyo is dhex galka gudaha dalalka gobolka IGAD;

(d) juquraafi ahaan in uu ku dhow yahay dalalka iyo inay ka dhaxeeyso isku tiirsanaan isaga iyo Dalalka Xubnaha ka ah ee kale;

(e) siyaasadahiisa bulsho iyo dhaqaale ee dalkaasi inay lamid yihiin kuwa dalalka IGAD.

4. In dal la siiyo martabad goobjooge, ama uu ka qayb galo hawlaha khuseeya IGAD oo ay tahay:

(a) haddii dalkaasi uusan xubin ka ahayn, waxaa leh awoodda Golaha Guud; iyo

**(b)** haddi ay noqoto urur dawladeed ama urur bulshada rayidka ah, waxa leh Golaha Wasiirada.

5. Habka loo raacayo xeerarka kor ku xusan ee Heshiiskan waxaa go'aamin doona Fadhiga Guud (Madaxeynayaasha).

## Qodobka 9
## Awoodda Sharciyeed ee IGAD

1. IGAD waxay yeelanaysaa awooda shakhiyad qaanuuni ah si ay u fuliso tallaabo kasta oo sharci ah oo ku habboon ujeeddooyinkeeda.

2. IGAD, iyadoo adeegsanaysa shakhiyadeeda qaanuunig ah, waxaa metelaya Xoghaynta Fulinta.

# CUTUBK LABAAD
# UNUGYADA IYO MU'ASASAADKA IGAD

## Qodobka 10
## Xubnaha IGAD

**1.** Qaybahaan soo socdaa waa unugyada IGAD:

**(a)** Fadhiga Guud ;

**(b)** Golaha

(c) Guddiga Danjirayaasha;

**(d)** Xoghaynta;

**(e)** wixii kale ee unugyo ah ee laga yaabo in ay dhisaan Fadhiga Guud ;

**2.** Unugyada IGAD waxay gudanayaan shaqooyinka, waxayna fulinayaan in ku siman awoodaha la siiyey ee ku cad Heshiiska ama habracayada ay kala leeyihiin.

## Qodobka 11
## Fadhiga Guud

1. Fadhiga Guud wuxuu noqon doonaa unuga ugu sarreeyaIGAD.

**2.** Fadhiga Guud wuxuu ka koobnaan doonaa Madaxda ugu saraysa Dowladaha Xubnaha ka ah, ama ciddii ay u soo magacaabeen in ay matalaan.

3. Fadhiga Guud wuxuu:

**(a)** go'aaminayaa siyaasadaha guud, wuxuuna kormeerayaa shaqooyinka IGAD;

**(b)** wuxuu kormeerayaa dhaqangelinta siyaasadaha iyo go'aamada la gaaro, sidoo kalena wuxuu xaqiijinayaan siday dhammaan Dowladaha Xubnaha ahi ugu hoggaansamaan;

(c) wuxuu siinayaan Golaha Wasiirada iyo qaybaha kale ee IGAD in ay si dhamaystiran u fulinyaan Heshiiska, xallinta khilaafaadka, dagaallada iyo xaaladaha kale ee degdega ah iyo nabad soo celinta;

**(d)** dhismaha unugyada IGAD;

(e) In la siiyo xubnimada IGAD dal kasta oo buuxiyey shuruudaha iyo xeerarka lagu xusay qodobka 8aad ee Heshiiska;

(f) magacaabista Xoghayaha Fulinta marka Golaha ay soo jeediyaan;

(g) tixgelinta warbixinnada ku saabsan guulaha la gaaray iyo xogaha kale oo loo gudbiyo Golaha sida uu dhigayo Heshiisku;

**(h)** meel marinta qiimeynta qiyaasta lacagaha xubinnimada Dowladaha Xubnaha ka ah ay ku bixiyaan misaaniyadda IGAD, marka Goluhu soo jeediyo iyo

(i) meel marinta misaaniyad sanadeedka IGAD oo waafaqsan talooyinka uu Goluhu soo jeediyey.

**4.** iyadoo la raacayo Heshiiska, Fadhiga Guud wuxuu Golaha u daadajin karaa hawlo gaar ah oo ka mid noqon kara waajibaadkiisa.

5. Xeerarka iyo go'aamada Fadhiga Guud waxaa soosaarayaa Xoghayaha Fulinta.

6. Go'aamada ay soo saareen Fadhiga Guud waa kuwa ku dhaqankooda ay waajib ku tahay dhammaan Dowladaha Xubnaha ah.

7. Dhammaan warbixinno maaliyadeedka IGAD ee sanad kasta waa in Goluhu dib u eegis ku sameeya, loona gudbiyaa Fadhiga Guud.

## Qodobka 12
## Kulamada Fadhiga Guud

**1.** Fadhiga Guud wuxuu sanadkiiba kulmi doonaa hal mar oo ah kulanka caadiga ah iyo sidoo kale wuxuu qabsan karaa kulamo aan caadi ahayn haddii xubin ka mid ah Dalalka Xubnaha ahi ay codsato, kadibna ay ku raacaan inta badan xubnuhu.

**2.** Saddex meelood oo laba guud ahaan xubnaha ah haddii ay joogaan waxaa guntamaya tirada (quorum) fadhiga shirka ee Fadhiga Guud .

**3.** Go'aamada Fadhiga Guud waa in ay noqdaan wada-ogol, haddii taas la waayo waxay noqonayaan cod dheeri iyo saddex meelood oo laba arrimaha muhiimka ah ama hababka kale ee ay isku raacaan Fadhiga Guud .

**4.** Iyadoo la raacayo xeerarka Heshiiska, Fadhiga Guud wuxuu go'aamin doonaa hab raacooda.

### Qodobka 13

### Guddoomiyaha Fadhiga Guud

**1.** Guddoomiyaha Fadhiga Guud wuxuu noqon doonaa mid meerto ah, iyadoo lagu salaynayo habka kala horaynta xarfaha oo lagu salaynayo Madaxda Dowladaha iyo Xukuumadaha Xubnaha ka ah.

**2.** Muddo xileedka Gudoomiyaha Fadhiga Guud uu xafiiska haynayaa waa hal sano.

**3.** Madaxda Dowladaha ama Xukuumadaha ee noqonaya Guddoomiye Ku Xigeen waxaa lagu xulayaa sida xarfaha alifbeetadu u kala horeeyaan, wuxuuna noqonayaa Gudodomiye ku xigeenka IGAD.

## Qodobka 14

## Golaha Wasiirda

**1.** Golaha wuxuu noqon doonaa unuga siyaasadda ee IGAD.

**2.** Goluhu wuxuu ka koobnaanayaa Wasiirada Arrimaha Dibadda ama wasiirkii kale ee Dowladaha Xubnaha ahi ay u soo magacaabaan ama cidii kale ee ay u wakiilato in ay u metesho.

## Qodobka 15
## Shaqada Golaha

**1.** Goluhu wuxuu u soo bandhigaya Fadhiga Guud talooyin ku saabsan arrimaha siyaasadda ee khuseeya habsami u socodka hawlaha iyo horumarinta IGAD si waafaqsan Heshiiska.

**2.** Goluhu wuxuu sare u qaadayaa, la soconayaa, oo korjoogtaynayaa dhaqan gelinta siyaasadaha, hab-raacyadaa iyo sharciyada , istiraatiijiyadaha iyo barnaamijyada IGAD, waxayna xaqiijinayaan habsami u socodka shaqada iyo horumarinta IGAD, si waafaqsan Heshiiska.

**3.** Iyadoo la eegayo ujeedooyinka jumladaha 1 iyo 2 ee Qodobkani, Goluhu wuxuu;

a) soo saarayaa xeerar, awaamiir iyo qaadashada go'aamo looga gol leeyahay in lagu xaqiijiyo dhaqangelinta siyaasadaha, hab-raacyada, istaraatiijiyadaha iyo barnaamijyada lagama maarmaanka ah, si hab wax ku ool ah loogu shaqeeyo horumarinta IGAD;

b) In ay u soo gudbiyaan talooyinka Fadhiga Guud kuwaasoo ku saabsaan siyaasadaha aasaaska u ah ujeedooyinka si wacan loogu shaqayn karo iyo horumarinta IGAD;

c) tixgeliyaan tallaabooyinka ay tahay in ay qaadaan Dawladaha Xubnaha ka ah si loo xaqiijiyo gaaritaanka ujeedooyinka iyo himilooyinka IGAD

d) tixgeliyaann dib u eegista iyo soo gudbinta miisaaniyadda IGAD si ay Fadhiga Guud u meel mariyaan;

e) dib u eegis iyo meelmarin ku sameeyaan shuruucda shaqaalaha iyo xeerarka IGAD;

f) magacaabaan Ku Xigeenka Xoghaynta Fulinta ama Xog-haynada

g) dib u eegaan, meelna mariyaan sharciyada maaliyadeed iyo xeerarka IGAD;

h) u gudbiyaan Fadhiga Guud warbixinnada waxqabadka;

i) diyaariyaan ajandayaasha kulamada Fadhiga Guud ;

j) dhaqangeliyaan go’aamada iyo awaamiirta ka soo baxa Fadhiga Guud ;

k) in ay helaan, dibna u eegaan waxrbixinaha ka yimaadda Xoghaynta

l) inay masuuliyad iska saaraan shaqo kastoo ay u soo xil saaraan Fadhiga Guud

**4.** Iyadoo la raacayo Heshiiska, Goluhu wuxuu u dirsan karaa wajibaad cayiman oo ka mid ah shaqooyinkeeda Guddiga Danjirayaasha, Gole Waaxeed, Guddiga Xeeldheerayaasha ama Xoghayaha Fulinta.

**5.** Goluhu wuxuu dhisan karaa Gole Waaxeed iyo Guddiyo Xeeldheerayaal ah oo wax ka qabta arrimaha waaxyahooda iyo shuruudaha hadba sida Goluhu uu go’aamiyo.

**6.** Go’aamada Gole Waaxeed gaaraan waxaa loo gudbin doonaa kulamada caadiga ah ee Golaha si ay dib ugu eegaan. Markay meel marinayaan, kaddib go’aamada Gole Waaxeedka waxaa loo tixi gelin doonaa go’aamo ka soo baxay Golaha.

**7.** Goluhu, isagoo raacaya qodobada Heshiiska iyo awoodda la siiyey, wuxuu qaadan karaa xeerar, awaamiir, iyo go'aammo.

## Qodobka 16
## Kulamada Golaha

**1.** Goluhu ugu yaraan sanadkiiba wuxuu kulmi doonaa labo goor oo ah kulan caadi ah, kulan ka mid ahi waa kulan si degdeg ah ugu xiga kulan sanadeedka guud ee Fadhiga Guud .

**2.** Kulamada Golaha waxaa guddoomin doona Wasiirka Arrimaha Dibadda ee dalka haya guddoonka IGAD ama wasiirkii kale ee uu u soo igmado isla dalkaasi.

**3.** Kulamada aan caadiga ahayn ee Golaha waxaa lagu qaban karaa codsi ka yimaadda Dal Xubin ah ama Guddoomiyaha Golaha ayaa ku qaban kara codsi uga yimaadd Dal Xubin ah ama Guddomiyaha Golaha marka ay ogolaadaan inta badan Dalalka Xubnaha ah.

4. Marka laga reebo sida ku qeexan Heshiiska, Goluhu wuxuu go'aanadiisa ku qaadan doonaa wada-ogol, haddii taasi dhici waydana aqlabiyad hal-dheeri ah oo ku saabsan arrimaha habraaca iyo codayn saddex-meelood oo laba-meelood haddii ay arrintu tahay mid culus.

**5.** Sida uu qabo Xeerka Heshiisku, Goluhu wuxuu go'aamin doonaa xeerarkiisa.

### Qodobka 17
### Guddiga Danjirayaasha

Guddiga Danjirayaashu waxay ka koobnaan donaan Safiirada Dalalka Xubnaha ah ama Safiirada leh Awoodaha aan Caadiga ahayn ee ku sugn markaas dalka ay ku taaallo Xarunta Dhexe ee Hay'addu. Guddiga Danjirayaashu waxay xogta siinayaan Golaha.

## Qodobka 18
## Shaqada Guddiga Danjirayaasha

**1.** Guddiga Danjirayaashu waxay:

**(a)** Tala bixin siinayaan Xog-haynta, taasoo ku saabsan qorshe hawleedka barnaamijyada iyo waaxyaha kala duwan ee ay iskaashadaan, isna dhexgalaan, iyagoo taxliilinaya qorsheyaasha ay soo jeediso Xog-haynta iyo in ay xaqiijiyaan in ay la jaanqaadayso ujeedooyinka istiraatijiyadeed ee IGAD;

**(b)** Waxay ka talo bixinayaan tallaabooyinka dhammaan la qaadayo ee iskaashiga ah in ay la jaanqaadayaan ujeedooyinka IGAD, si Xog-hayntu u fuliso;

**(c)** hagista Xog-haynta ee dhaqangelinta qodobada heshiiskan ee ay fulinayaan Xoghaynta iyo guddiyada kale ee Xeeldheerayaasha ah ee uu aasaasi karo Goluhu isaga oo isticmaalaya sida ku cad awoodihiisa ku xusan Heshiiskan;

**(d)** Waxay talo bixin siinayaan Xog-haynta, taasoo ku saabsan fulinta xeerarka Heshiiskan;

**(e)** Talo-siinta Xog-haynta eek or u qaadista dadaalladooda ku aaddan xaqiijinta qorshe-hawleedka ay ansixiyeen Golaha Wasiirrada;

**(f)** Jihaynta Xog-haynta ee tarjumaadda siyaasadaha iyo habraacyada kuwaasoo u baahan kara in loo helo sharaxaad dheeraad ah;

(g) Waxay kale uu fulinayaan shaqooyinkii kale ee uu Goluhu u dhiibo.

2. Iyadoo la raacayo awaamiirta Golaha, Guddiga Danjirayaashu waxay yeelanayaan shirar joogto sidii loogu baahdo iyo markii loo baahdo si ay dib ugu eegaan hawlaha Xog-haynta.

3. Dhammaan go'aamada Guddiga Danjirayaasha waxaa lagu gaari doonaa wada-ogol. Haddii Guddigu ku guul daraysto in ay heshiis ku gaaraan wada-ogol, go'aanadu waxa lagu qaadan doonaa hab cod dheeri ah iyo saddex meelood oo laba xubnaha joogaa in ay isku raaceen arrimaha la taaban karo.

## Qodobka 19
## Dhismaha Xog-haynta

**1.** Xog-hayntu waxy noqon doontaa unug fulin oo ka tirsan IGAD.

**2.** Xog-hayntu waxaa loo dhisi doonaa sidaan soo socota:

**(a)** Xog-hayaha fulina;

**(b)** Lab ku xigeen oo Xog-hayaha fulinta ah;

(c) Xafiisyo kale, qaybaha ama hay'adaha maamul hadba sidii loogu arko in uu baahanyahay Goluhu.

3. Magacaabista xubnaha shaqaalaha ee xafiisyada Xog-haynta, iyadoo la dhawrayo nidaamka

waa in la siiyaa sugidda heerarka ugu sarreeya ee daacadnimada, hufnaanta iyo kartida farsamo, sinnaanta jinsiga, sinnaanta fursadaha iyo si siman loogu qaybiyo magacaabista xafiisyada shaqaalaha xafiisyada dhammaan muwaadiniinta Dawladaha Xubnaha ka ah.

## Qodobka 20
## Shaqooyinka Xog-hayaha

Si looga miradhaliyo ujeedooyinka iyo yoolasha IGAD, Xog-hayntu waxay qaban doontaa;

(a) keenista siyaasadaha, agabyada sharci, barnaamijyada iyo mashaariicda, waxayna talo bixin usoo diyaarinayaan Golaha, iyagoo soo jeedinaya go'aamada siyaasadeed iyo awaamiirta;

**(b)** waxay qabanayaan daraasado iyo cilmi baaris la xiriirta, fulinta barnaamijyada iyo mashaariicda;

(c) in ay hor mariyaan istiraatijiyadda qorshaynta, maamul iyo kormeerka barnaamijyada iyo mashaariicda IGAD;

**(d)** waxay la imaanayan hindisayashooda, ama waxay ku hawlgalayaan go'aamada Golaha, sida baaritaannada, xog ururinta ama xaqiijinta arimaha la xiriira wax kastoo saamaynaya IGAD, kuwaasoo u baahan in lagu sameeyo baaritaano;

(e) isku dubaridka iyo isku-dhafidda siyaasadaha iyo istiraatijiyadda la xariirta ujeedooyinka iyo yoolasha IGAD;

**(f)** diyaarinta iyo soo gudbinta warbixinadda maamulista iyo maaraynta maaliyadda, oo ay ku jirto miisaaniyadda Golaha siday ugu baahan yihiin;

**(g)** diyaarinta qorsheyaasha lagu raadiyo dhaqaalaha ee laga helayo bahwadaagta horumarinta iyo ilaha kale, si loogu fuliyo barnaamijyada iyo mashaariicda IGAD;

**(h)** kor u qaadista iyo faafinta xogaha guud ee ku saabsan IGAD oo la siinayo dhinacyada ay khusayso, dadweynaha iyo Beesha Caalamka;

(i) diyaarinta warbixinaha ku saabsan wax qabadka IGAD iyo in ay u gudbiyaan Golaha;

(j) in ay diyaariyaan qabyo-qoraalada ajanadayaasha shirarka unugyada IGAD:

(k) fuliyaan go'aamada Fadhiga Guud (madaxda) iyo Golaha (wasiirada);

(I) la socoshada arrimaha soo ifbaxa iyo kuwa soo noqnoqda ee saameeya gobolka;

(m) diyaarinta, agaasinka iyo kaydinka xogaha iyo qoraalada shirarka waaxyaha iyo hay'adaha maamul ee IGAD, iyo

**(n)** wixii kale ee arrimo ah ee loo dhiibo, kuwaasoo ka soo baxa Heshiiska.

## Qodobka 21
## Xog-hayaha Fulinta

**1.** Xog-hayaha Fulinta waxaa magacaabi doona Fadhiga Guud , muddada xil-hayntiisuna waa afar sano oo loo cusboonaysiin karo hal mar, waana xil meerto ah;

**2.** Xog-hayaa Fulinta wuxuu noqon doonaa sarkaalka madax fulinta ee IGAD, wuxuuna yeelanayaa xilalka iyo waajibaadyada soo socda:

**(a)** Wuxuu metelayaa IGAD, isagoo difaacaya danaheeda, kuna shaqaynaya hagista iyo waajibaadka ay siiyeen Golaha (Wasiirada) iyo Fadhiga Guud (Madaxda);

**(b)** wuxuu fulinayaa go'aamada ay gaareen unugyada IGAD;

**(c)** wuxuu u shaqaynayaa sida xog-hayaha Guddiga Danjirayaasha, Golaha (Wasiirada) iyo Fadhiga Guud (Madaxda);

**(d)** wuxuu qabanqaabinayaa Shirarka Fadhiga Guud , Golaha, Guddiga Danjirayaasha iyo

wixii kale ee shir ah oo ku saabsan jihaynta Fadhiga Guud ama Golaha;

(e) waa ilaaliyaha dukumentiyada iyo hantida IGAD; waa kayd hayaha dhammaan heshiisyada IGAD iyo qoraallada kale ee sharciga ah iyo hawlaha la qabtay ee la mid ka ah;

**(f)** diyaarinta talo-bixinnada si loo fuliyo waajibaadka IGAD iyadoo la tix gelinayo siyaasadaha ku haboon ee unug kasta;

**(g)** diyaarinta miisaaniyadda IGAD, isagoo u gudbinaya Fadhiga Guud, wuxuuna u sii marinayaa Guddiga Danjirayaasha iyo Golaha;

**(h)** gudbinta warbixin sanadeedka ku saabsan hawlaha iyo qorshaynta IGAD iyo warbixinaha maaliyadeed isagoo u diraya Golaha, una sii marinaya Guddiga Danjirayaasha;

(i) wuxuu qaadayaa tallaabooyinka iyo barnaamijyada ay ujeedkoodu tahay kor u qaadista ujeedooyinka iyo hiigsiga IGAD, isagoo tix gelinaya unugyada IGAD;

(j) wuxuu xoojinayaa wada shaqaynta ururo goboleedka kale, Midowga Afrika, Qaramada Midoobay iyo kuwa gobolka qaaradaha iyo hay'adaha maaliyadda aduunka;

(k) wuxuu xoojinayaa wada shaqaynta lala leeyahay saaxiibada kale iyo bahwadaagta kale si loo joogteeyo ujeedooyinka iyo hiigsiga IGAD;

(l) la tashanayaa, la xiriirayaa Dowladaha iyo hay'addaha kale ee maamul ee Dowladaha Xubnaha ah;

(m) la xaajoonayaa isagoo haysta ogolaansha Gudoomiyaha Golaha, dowladaha kale, hay'adaha caalamiga ah iyo bahwadaagta si loo helo maaliyad iyo taageero farsamo, isagoo wakiil ka ah IGAD;

**(n)** in uu qabanqaabiyo hawlaha Xoghaynta iyo unugyada IGAD;

(o) qorista shaqaalaha IGAD si waafaqsan Sharciga shaqaalaha IGAD;

(p) kormeerka maaraynta shaqada Xoghaynta, maamulka maaliyadda iyo maamulka shaqaalaha ee IGAD;

(q) fulinta hawlaha kale ee laga yaabo in ay go'aamiyaan Fadhiga Guud ama Golaha waqti ka waqti.

3. Shuruudaha iyo xeerarka uu ku shaqaynayo Xog-hayaha Fulintu waxaa go'aaminiya Golaha, waxaana meel marinaya Fadhiga Guud.

## Qodobka 22
## Xog-haye Ku Xigeenada

**1.** Labad Ku Xigeen ee Xog-hayaha Guud waxaa magacaabi doona Golaha, muddada xil-hayntooduna waa afar sano, oo hal mar la cusboonaysiin karo, iyadoo loo raacayo xeerarka iyo mabaadii' ku dhisan wax qaybsi si siman

**2.** Ku Xigeenada Xog-hayaha Guud kama imaan karaan isku wadan, kamana imaan kara isla wadanka uu ka soo jeedo Xog-hayaha Fulintu.

3. Ku Xigeenada Xog-haynta Fulintu waxay waajibaad ahaan gacan siinayaan Xog-hayaha Fulinta si uu u guto waajibaadkiisa shaqo;

**4.** Shuruudaha iyo xeerarka shaqo ee Ku Xigeenada Xog-hayaha waxaa go'aaminaya Golaha.

**Qodobka 23**
**Saraakiisha kale iyo Xubnaha Shaqaalaha ee Xog-haynta**

**1.** Waxaa jiri doona saraakiil iyo shaqaale kale oo qabanaya shaqada IGAD hadba sida Goluhu u go'aamiyo.

2. Dhammaan shaqaalaha Xog-haynta waxaa lagu shaqaalaynayaa heshiis iyo nidaam waafaqsan Xeerarka Shaqada ee IGAD.

3. Mushaharka, tilmaamaha shaqada, shuruudaha kale iyo xaaladaha shaqada ee shaqaalaha waxaa lagu go'aaminayaa Xeerarka Shaqada ee IGAD.

**4.** Magacaabista xubnaha saraakiisha ee xafiisyada Xog-haynta, iyadoo la tix gelinayo waxaa lagu shaqaalaynaya heerka ugu sarreeya ee hufnaanta, wax qabadka farsamo, sinnaanta shaqada ee rag iyo dumar, u sinnaanta fursadaha iyo in fursadaha magaacaabista ay u siman u helan muwaadiniinta Dowladaha Xubnaha ah.

## CUTUBKA SADDEXAAD: DHINACYADA ISKAASHIGA

### Qodobka 24
### Dhinacyada Iskaashiga

Dowladaha Xubnaha ka ahi waxay iska kaashanayan dhinacyadaan soo socda;

(a) horumarinta iyo xornimada ganacsiga;

**(b)** gaadiid iyo isgaarsiinta;

**(c)** dalxiiska;

**(d)** tamarta, khaas ahaan horumarinta tamarta la cusboonaysiiyo;

**(e)** beeraha iyo haqab beelka cuntada;

(f) ilaalinta deeganka iyo maaraynta khayraadka dabiicig ah;

**(g)** abuurista jawi ay ku shaqeyn karaan ganacsiyada gaarka loo leeyahay;

**(h)** abuurista jawi ay ku hawlgali karaan bulshada rayidka ah hay'adaha xirfadlayaasha;

**(i)** sinnaanta jinsiga iyo awoosiinta haweenka iyo gabdhaha;

**(j)** maal gashiga;

**(k)** xornimada isu socodka badeecooyinka, dadka, muruq-maalka, adeegyada iyo hantida;

**(l)** dowlad wanaagga, nabadda iyo amaanka;

**(m)** horumarinta iyo ka faa'iidaysiga karaanka dadka;

**(n)** wax barashada, sayniska iyo tiknoolajiyada;

**(o)** daryeelka bulshada;

**(p)** caafimaadka;

**(q)** dhaqanka iyo ciyaaraha;

**(r)** iyo meelihii kale ee Dalalka Xubnaha ahi ay go'aansadaan si loo sii dhaqaajiyo ujeedooyinka iyo hiigsiga Heshiiska.

## Qodobka 25
## Horumarinta iyo Ganacsiga Xorta ah

**1.** Iyadoo la raacayo Qodobka 24, lana fiirinayo sida ku soo baxday Qodobka 56 ee Heshiiska, Dalalka Xubnaha ahi waxay horumarin karaa farsamad iyo wax qabadka si loo gaaro ujeedooyinka Heshiiska Abuja iyo Heshiiska Ganacsiga Xotga ah ee Qaaradda Afrika.

**2.** IGAD waxay soo saari kartaa xeerar, awaamiir iyo go'aamo ay gaarto iyadoo looga gol leeyahay yahay fulinta ujeedooyinka iyo himilooyinka Heshiiskii Abuja iyo Heshiiska Ganacsiga Xotga ah ee Qaaradda Afrika.

## Qodobka 26
## Gaadiidka iyo Isgaarsiinta

Si loo gaaro ujeedooyinka iyo hiigsiga IGAD, iyadoo la raacayo Qodobka 24, Dalalka Xubnaha ahi waxay isku duba ridayaan, dejinayaan siyaasadaha gaadiidka iyo isgaarsiinta, waxay ku samaynayaan horumarin iyo ballaarin isku xirkii gaadiid iyo isgaarsiin ee horay u jiray, waxayna abuurayaan kuwo cusub.

## Qodobka 27
## Dalxiiska

Si loo gaaro ujeedooyinka iyo hiigsiga IGAD iyo iyadoo la raacayo Qodobka 24, Dalalka Xubnaha ahi waxay isku dubaridayaan, mideynayaan, ayna horumarinayaan siyaasado kor loogu qaadayo dalxiiska gobolka dalalka IGAD.

## Qodobka 28
## Tamarta

Iyadoo la raacayo Qodobka 24, Dalalka Xubnaha ahi waxay garwaaqsanayaan in helista tamar leh sicir lagu tartami karo ay tahay shardi hor dhac u ah horumarinta dhaqaalaha iyo in la xaqiijiyo sicir macquul ah oo lagu bixin karo tamarta la siinayo dhammaan Dalalka Xubnaha ahi ee ay uga baahan yihiin horumrinta khayraadka tamarta gudaha iyo hannaanka maaraynta beekhaaminta ee ilihii horay u jiray.

## Qodobka 29
## Beeraha iyo Haqab-beelka Cuntada

Dowladaha Xubnaha ahi waxy isku raaceen guud ahaan ujeedooyinka ka wada shaqaynta dhinaca beeraha in ay tahay sida lagu gaarayo haqab-beelka cuntada iyo raashin ku filan oo ay helaan dalalka IGAD. Sidaas darted, iyadoo la raacayo Qodobka 24, Dalalka Xubnaha ahi waxay isku dubaridyaan, horumarinayaan, soona saarayaan siyaasado lagu xaqiijinayo haqab-beelka cuntada ee dalalka IGAD iyo joogtaynta kor u qaadista wax soo saarka dalaga beeraha, xoolaha nool, kalluumaysiga iyo kaymaha.

## Qodobka 30
## Maaraynta Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga ah

Iyadoo la raacayo Qodobka 24, Dalalka Xubnaha ka ah waxay aqoonsan yihiin in deegaan nadiif ah, caafimaad qaba uu lagama maarmaan u yahay joogtaynta horumar waara. Sidaa darteed, Dalalka Xubnuhu waxay isku raaceen in ay qaadaan tallaabooyin wada jira oo lagu kobciyo iskaashiga iyasoo si wadajir ah loo maamulayo sidii hannaan waara looga ka faa'iidaysan lahaa khayraadka dabiiciga ah, ilaalinta iyo dhowridda deegaanka dalalka IGAD.

## Qodobka 31
## Xoojinta jawi ay ku hawl galaan Ganacsiyada Gaarka loo leeyahay

Dowladaha Xubnaha ahi waxay isku raaceen in ay siiyaan jawi u fududaynaya ganacsiyada gaarka loo leeyahay in ay si buuxda uga faa'iidaystaan fursadaha ganacsi ee ka dhex jira dalalka IGAD. Si taas loo helo waa in Dalalka Xubanaha ahi horumariyaan xaaladaha ganacsiga ee heer qaran iyo heer goboleed si loo horumariyo ganacsiyada gaarka ah.

## Qodobka 32
## Xoojinta Bulshada Rayidka ah iyo Xirfadlayaasha

Dowladaha Xubnaha ahi waxay isku raaceen in ay siiyaan awood ay bulshada rayidka iyo xirfadlayaashu uga qayb galaan si ay wax ugu kordhiyaan kor u qaadista iyo xaqiijinta ujeedooyinka iyo hiigsiga IGAD.

## Qodobka 33
## Sinnaanta jinsiga iyo awood-siinta haweenka iyo gabdhaha

Dawladaha Xubnaha ka ah waxay aqoonsan yihiin in haweenku ay gacan weyn ka geystaan geeddi-socodka isbeddelka bulshada iyo horumar waara, waxayna u baahan yihiin inay si buuxda uga qayb-galaan horumarinta iyo hirgelinta siyaasadaha iyo barnaamijyada IGAD iyo Dowladaha Xubnaha ka ah. Si taas loo gaaro, IGAD iyo dowladaha xubnaha ka ah waa in ay qaadaan tallaabooyin ku habboon si loo xaqiijiyo in qof kasta oo dumar iyo gabar ahi ay helaan sinnaan buuxda oo jinsiga ah iyo dhammaan xuquuqda sharciga, siyaasadda, bulshada, dhaqaalaha, iyo in la xaqiijiyo ka qaybgalka haweenka iyo hoggaanka dhammaan noocyada go'aan qaadashada, iyo qaadista tallaabooyinka kale oo meesha ka saaraya faquuqa iyo xadgudubyada ka dhanka ah haweenka.

## Qodobka 34
## Maalgashiga

Dawladaha Xubnaha ka ah waxay isku raaceen inay abuuraan jawi awood siiinaya maalgashiga iyo horumarinta ganacsiga. Si taas loo gaaro, Dawladaha Xubnaha ka ah waxay ballan qaadayaan qaadashada siyaasado isku mid ah oo ujeeddadoodu tahay soo jiidashada maalgashiga ganacsiga gaarka loo leeyahay ee gobolka IGAD, abuuritaanka iyo joogtaynta jawi maalgashi oo la saadaalin karo, loo siman yahay iyo xaalad maal gashi oo sugn.

## Qodobka 35
## Xornimada Isu socodka, Dadka, Xoogsatada, Badeecooyinka, Adeegyada iyo Hantida

Dowladaha Xubnaha ahi waxay isku raaceen iskaashiga in la fadudueeyo iyo la qaado tallaabooyinka lagama maarmaanka ah si loo gaaro isu socod xor ah oo badeecooyinka, dadka, xoogsatada, adeegyada iyo hantida ee gudaha dalalka IGD iyadoo lagu shaqaynayo Heshiiska Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika.

## Qodobka 36
## Dowlad wanaagga, Nabad gelyada iyo Amniga

Si loo gaaro ujeedooyinka iyo hiigsiga IGAD, iyadoo la raacayo Qodobka 3, Dowladaha Xubnaha ka ahi waxay isku raaceen in dowlad wanaagga, nabad gelyada iyo amnigu ay foolaad u yihiin in la helo horumar waara iyo guul halbowle u ah is dhex galka goboleed

ee IGAD. Dowladaha Xubnaha ka ahi waxay isku raaceen xoojinta dowlad wanaagga iyadoo la xaqiijinayo tix gelinta sarraynta sharciga iyo xuquuqda aadanaha iyo in la gaaro nabad iyo amni iyadoo loo marayo awoodooda in la xaliyo khilaafyada gudaha, murannada dowladaha iyo isku dhacyada.

## Qodobka 37
## Horumarinta iyo Ka-faa'iideysiga Karaanka Aadanaha

Dowladaha Xubnaha ahi waxay isku raaceen in ay qaadaan tallaabooyin wadajira si loo loo xoojiyo iskaashiga horumarinta kaaranka aadanaha iyo si weyn looga faa'iidaysto awoodda dadka, aqoonta farsamo iyo awoodaha hay'adaha maamul.

## Qodobka 38
## Aqoonta, Sayniska iyo Teknooljiyadda

Dowladaha Xubnaha ka ahi waxay qaadayaan tallaabooyin lagu abuurayo jawi ku habboon si ay u kobciyaan iskaashiga horumarinta waxbarashada, sayniska, teknoolojiyadda iyo hal abuurka, iyadoo loo marayo mideynta siyaasadaha iyo barnaamijyada

## Qodobka 39
## Daryeelka Bulshada

Dowladaha Xubnaha ka ah waxay ballan qaadayaan inay kobciyaan iskaashiga ilaalinta bulshada, horumarinta iyo fulinta tallaabooyin lagu ilaalinayo xuquqda iyo daryeelka carruurta, waayeelka, dhallinyarada, dadka naafada ah, iyo dadka danyarta ah iyo kuwa la takooro.

## Qodobka 40
## Caafimaadka

Dowladaha Xubnaha ka ah waxay ballan qaadayaan inay qaadaan siyaasad wadajir ah iyo tallaabooyinka kale ee lagama maarmaanka u ah xoojinta iskaashiga waaxda caafimaadka ee ka hortagga iyo ciribtirka cudurrada, kor u qaadista waxtarka adeegyada daryeelka caafimaadka, kobcinta cilmi-baarista iyo horumarinta.

## Qodobka 41
## Dhaqanka iyo Ciyaaraha

Dowladaha Xubnaha ahi waa in ay horumariyaan iskaashiga dhaw oo u dhexeeya ee dhaqanka, ciyaaraha, waxayna ku heshiiyeen horumarinta iyo ilaalinta waxyaabaha dhaxal-dhaqameedka ah ee gobolka IGAD, iyo in kor loo qaaado doorka dhaqan iyo ciyaaro ee horumarinta dhaqan-dhaqaalaha bulshada gobolka.

# CUTUBKA AFRAAD: IKAASHIGA URUR GOBOLEEDYADA KALE, MIDOWGA AFRIKA IYO HAY'ADAHA KALE EE CAALAMIGA AH

## Qodobka 42
## Heshiisyada kaleEE Urur Goboleedyada, Midowga Afrika

**1.** Dowladaha Xubnaha ahi waxay adkaynayaa rabitaankooda iyo ka ballanqaadkooda ee guud ahaan Afrika, waxayna u arkaan is dhex galka dhaqaalaha ee IGAD ay tahay tallaabo loo qaaday gaaritaanka ujeedooyinka Heshiiska Asaaska Bulshada Dhaqaalaha Afrika.

**2.** IGAD waxay kobcinaysaa xiriirka iskaashiga wadashaqayn ee ay la yeelanayso ururada kale

ee gobolka, qaaradda iyo hay'adaha caalamiga ah kuwaasoo hawlahoodu saamayn ku leeyihiin ujeedooyinka IGAD.

## Qodobka 43
## Qaramada Midoobay, Hay'adaha kale ee Caalamiga ah iyo Bah-wadaagta Horumarinta

**3.** IGAD iyo Dowladaha Xubnaha ka ahi, waxay muhiimad siinayaan iskaashiga ay la yeelanayaan Qaramada Midoobay iyo Hay'adaheeda kala duwan, ururada heer goboleed iyo heer caalami, bah-wadaagta uu ka dhaxeeyo iskaahsiga labada dhinaclaha ah iyo kan dhinacyada badan, sidoo kale bulshooyinka dhaqalaha ee goboleed iyo kuwa caalamiga ah.

# CURTUBKA SHANAAD: BIXINTA MAALIYADDA

## Qodobka 44
## Miisaaniyadda

**1.** Waxaa jiri doona miisaaniyad ay yeelanayaan unugyada iyo hay'adaha IGAD.

2. Xog-hayaha Fulinta wuxuu soo diyaarinayaa, soona gudbin doonaa miisaaniyad sanadeedka isagoo la tashanaya Guddiga Danjirayaasha, waxaana tixgelinaya Golaha, iyadoo lagu meel marinayo Fadhiga Guud.

3. Dhammaan waribixanadda maaliyadeed ee IGAD, iyadoo la tix gelinayo miisaaniyad sanadeed kasta waa in Golaha la socdaan, ayna meel mariyaan Fadhiga Guud.

**4.** Miisaaniyadda IGAD waxaa bixinaya Dowladaha Xubnaha ah oo midkasta ay qaybta loo qoondeeyey ay bixinayso iyo maaliyad ka imaanaysa deeq bixiyayaasha gobolka iyo kuwa caalamiga ah iyo ilaha kale, hadba sida ay ku meel mariyaan Goluhu.

**5.** Dhaqaalaha IGAD waxaa loo isticmaali doonaa in lagu bixiyo hawlaha IGAD.

**6.** Miisaaniydda iyo xisaabaadka IGAD waxaa lagu salaynayaa lacagta doolarka Dowladda Maraykanka.

## Qodobka 45
## Ilaha kale ee dhaqaalaha

**1.** Ilaha kale ee dhaqaalaha IGAD waxaa ka mid noqon kara sida miisaaniyad dheeri ah oo meelaha laga helay ka mid noqon karaan;

**(a)** deeqaha, kaalmada, deeqaha mashaariicda iyo barnaamijyada iyo kaalmada farsamada; iyo

**(b)** dakhliyada laga helo hawlaha ay qabato IGAD.

2. Miisaaniyada dheeraadka ah ee ka baxsan dhaqaalaha IGAD waxaa loo isticmaali doonaa in lagu maalgeliyo hawlaha IGAD.

## Qodobka 46
## Hantidhowrka Xisaabaadka

**1.** Waxa jiri doona Hanti-dhowre ka baxsan hay'adda oo ay magacaabayaan Golaha kaasoo shaqadiisu noqon doonto inuu fatasho xisaabaadka IGAD.

**2.** Hanti-dhowraha guduhu wuxuu u gudbin doonaa Warbixinta Fatashaadda gudaha iyo bannaanka Golaha isagoo usii marinaya Guddiga Hantidhawrku sanadkiiba, waxaa iyana sidaas oo kale loo gudbinayaa warbixintaas oo kale Fadhiga Guud.

3. Marka ay gudanayaan waajibaadkooda shaqo ee ku xusan qodobkan, Hanti-dhawrka gudaha iyo Guddida Hanti-dhawrku, ma jiri doonto qof ama maamul jihayn kara ama xakamayn kara hawshooda.

## Qodobka 47
## Xeerarka iyo Sharciyada Maaliyadda

4. Golaha ayaa meel marinaya xeerarka iyo sharciyada maaliyadd IGAD si waafaqsan mabaadii'da caalamiga ah ee la isla ogol yahay.

# CUTUBKA LIXAAD: QODOBO GUUD, KU MEEL GAARKA IYO XEERARKA UGU DANBEEYA

## Qodobka 48
## Xarunta dhexe iyo xafiisyada kale ee IGAD

**1.** Xarunta dhexe ee IGAD waxay noqonaysaa magaalada Jabuuti, Jamhuuriyadda Jabuuti.

**2.** Waxaa jiri kara in la aasaaso xafiisyo kale oo IGAD leedahay oo laga furo Dowladaha Xubnaha iyo meelihii kale, hadba sida Golaha ay go'aamiyaan.

**3.**

## Qodobka 49
## Afafka Rasmiga ah

Afafka rasmiga ah ee IGAD waxay noqon doonaan English, French iyo Carabi.

## Qodobka 50
## Heerka, Mudnaanta iyo Xasaanadaha,

**1.** IGAD waxay heli doontaa shakhsiyad qaanuuni oo caalami ah.

**2.** Xog-hayaha Fulintu waa in uu la dhamaystiraa Dowladaha Xubnaha ka ah ee dhulkooda ay ku taallo Xarunta Dhexe iyo Dowladaha Xubnaha ka ah ee dhulkooda ay ku yaallaan xafiisyada IGAD, heshiisyada la xiriira in ay aqoonsadaan mudnaanta iyo xasaanadda, waana inay bixiyaan xiriirka sida waafaqsan waajibaadka IGAD.

**3.** Dowlad kasta oo xubin ka ah waxay siinaysaa IGAD, xafiisyadeeda iyo shaqaalaheeda mudnaanta iyo xasaanadda la siiyo ururada gobolka iyo kuwa caalamiga ah.

## Qodobka 51
## Cunaqabataymaha

**1.** Dowlad kasta oo xubin ah taasoo ku guul daraysata in ay bixiso qaadhaanka maaliyadeed muddo laba sano waxaa loo diidi doonaa xuquuqda ay kaga hadasho kulamada, xuquuqda ay ku martigeliso ama ku guddoomiso shirarka, xuquuqda codbixinta ama xuquuqda ay ugu tartamayso jago kasta ama jago ka mid ah IGAD, ama in ay nacfi ka hesho hawlaha ama ballan qaadyada IGAD ama waxaa la saarayaa wixii kale ee cunaqabatayn ah ee ay u arkaan in ay ku habboon tahay ama ay go'aamiyaan Golaha Sare.

2. Dowlad kasta oo xubin ah taasoo ku guuldaraysata in ay u hogaansanto go'aamada iyo siyaasadaha waxaa loola dhaqmayaa in la saaro cunaqabatayn sida Golaha Sare, ay ugu soo talobixiyaan Golaha ama ay go'aamiyaan.

3. Fadhiga Guud, si kasta oo ay tahay, wuxuu u ogolaan karaa Dowladaha Xubnaha ah ee bixin kari waaya qaadhaankii laga rabay, in ay sii wadan karaan in ay si buuxda uga faa'iidaystaan Heshiiska, haddii Fadhiga Guud ay ku qancaan in sababta ay u bixin kari waayeen qaaraankii laga rabay ay tahay xaalad ka baxsan awoodda dowladaas.

## Qodobka 52
## Laalista Dowlad Xubin ah

1. Fadhiga Guud wuxuu laali karaa Xubinimada Dowlad, aysan ka qayb qaadan hawlaha IGAD muddo 18 bilood ah ama haddii aysan Dowlad xubin ahi aysan buuxin mabaadiida aasaasiga ah iyo ujeedooyinka Heshiiska oo ay ka mid tahay bixinta dhaqaalaha laga rabo.

2. Dowlad Xubin ah ee laga laalay xubinimada sida ku cad jumladda koowaad ee Qodobkaan, waxay waayeysaa in ay hesho faa'iidooyinka Heshiiskaani bixiyey, laakin waxay sii ku sii jiri doontaa xubinimada ilaa laga qaadayo hakintii lagu sameeyey.

## Qodobka 53
## Eryidda Dowlad Xubin ah

1. Fadhiga Guud waxay IGAD ka saari karaan Dowlad Xubin ah marka ay si cad ugu xad gudubto mabaadii'da iyo ujeedooyinka Heshiiska, waxaana la eryayaa marka Dalkaa Xubinta ah la siiyo 12 bilood oo ogaysiis qoraal ah.

2. Marka ay dhamaato mudada loo qabtay sida ku cad farqada 1 ee Qodobkan, Dowladda Xubinta ah ee digniinta la siiyey waxaa laga hakinayaa xubinimadeeda IGAD iyadoo la ogaysinayo, haddii aan ogaysiiska la hakin ama laga noqon.

3. Inta lagu jiro wakhtiga lagu sheegay farqadaha 1 iyo 2 ee Qodobkan, Dowladda Xubinta ah ee ay khusayso, waa in ay sii waddaa u hogaansanaanta qodobada Heshiiska, waxayna masuul ka tahay in ay ka soo baxdo dhammaan waajibaadka jira iyo ballan qaadyada mudada dheer ee la galay intay haysato xubinnimada.

4. Dowladda Xubin ah ee la eryey sida ku cad farqadda 1 ee Qodobka waxay xubinnimadeeda dib uga soo codsanaysaa Fadhiga Guud , markay buuxiso wajibaadyadii keenay in la eryo.

## Qodobka 54
## Ka-bixitaaka Dowlad Xubin ah

1. Dowlad Xubin ahi waxay ka bixi kartaa IGAD kaddib markay siiso 12 bilood oo ogaysiis ah Xoghayaha Fulinta oo ay ku dalbanayso in ay ka baxyso, haddii aysan Dowladaas Xubinta ahi ka noqonin qoraalkeeda ay ku dalbanayso ka bixidda ka hor inta 12 bilood aysan dhammaan.

2. Muddada laba iyo tobanka bilood ah ee ku xusan farqada 1aad ee qodobkan, Dawladaha xubinta ka ah ee doonaya inay ka baxaan IGAD waa inay si kastaba ha ahaatee dhawraan qodobada heshiiska, waxayna masuul ka tahay gudashada waajibaadkeeda ku xusan Heshiiska;

3. Waajibaadka laga rabo Dowladaha Xubnaha ah ee hoos imanaya Heshiiskan waa, in ay ka

fogaadaan wax kastoo keeni kara in lagala noqdo Dowladda Xubinta ah iyo in Dowladda Xubinta ah la laga rabaa u hogaansanto dhammaan waajibaadka iyo fulinta balanqaadyada wakhtiga dheer ee lagu galay xubinnimada.

4. Hanti iyo raasamaal kasta oo ay leedahay IGAD oo ku taalla gudaha dal ka mid ah Dalalka Xubnaha ah, kaasoo xubinimadii ka tegey, hantidaasi waxay sii ahaanaysaa hanti IGAD leedahay, waxayna noqonaysaa hanti markasta ay isticmaali karto IGAD.

5. Dowlad kasta oo xubin ah oo ka baxay xubinimada sida ku cad farqadda 1 ee Qodobkaan wuxuu dib uga codsan karaa Fadhiga Guud in loo ogolaado xubinnimadii sida ku qoran mabaa'iida Qodobka 8 ee Heshiiska.

## Qodobka 55
## Wax ka bedelka Heshiiska

1. Dal kastoo xubin ah ama Golaha waxay soo gudbin karaan soojeedimo ku saabsan wax ka bedelka Heshiiska oo ay u dirayaan Xog-hayaha Fulinga. Xog-hayaha Fulintu waa inuu muddo 30 maalmood ku helaa, una kala dirayaa Dowladaha Xubnaha ah soojeedinta la keenay.

2. Dowladaha Xubnaha ah ee doonaya in ay dood ka dhiibtaan soo jeedimaha wuxuu samaynayaan sidaas muddo 90 maalmood gudahood ah oo ka bilamanaysa taariikhda soo jeedinta uu soo diray Xoghayah Fulintu.

3. Markay dhammaato waxkhtiga lagu qeexay jumlada 3 ee Qodobka, Xoghayaha Fulintu wuxuu u gudbinayaa soo jeedinta Fadhiga Guud isagoo u sii marsiinaya Golaha.

4. Wax ka bedel kastoo lagu sameeyey Heshiiska waxaa meel marinaya Fadhiga Guud.

5. Wax ka bedelka la sameeyey wuxuu dhaqan ku noqonayaa sida ku cad Qodobka 58 ee Heshiiska.

## Qodobka 56
## Hab-raac iyo Lifaaqyada Heshiiska

1. Dowladaha Xubnaha ahi waxay afmeeri karaan Habraac kasta hadba sida ay lagama maarmaan u tahay meel kastoo ay iskaashi ka lahaayeen, kuwaasoo qeexaya ujeedooyinka iyo xayndaabka iyo farsamada maamul ee iskaashiga iyo is dhex galka.

2. Habraac kasta waxaa meelmarinaya Golaha iyadoo la fulinayo talooyinka Golaha.
3. Habraac kasta wuxuu dhaqangal ku noqonayaa saxiixiya iyo meelmarinta Dowladda Xubinta ka ah.

4. Lifaaqyada iyo Habraacyada lagu daray Heshiiskan qayb muhiim ah ka yihiin Heshiiska.

## Qodobka 57
## Hannaanka Xallinta Muranada

1. Muranada ka dhahsha fasiraadda waajibaadyada xusan Heshiiska, waa in si aan buuq lahayn Golaha Wasiirada uu u xalliyo, iyadoo loo marayo wadaxaajoodyo.

2. Fadhiga Guud, kaddib soo jeedin talo bixinta Golaha, wuxuu sameyn doonaa hab ku meel gaar iyo farsamo oo lagu xallinayo khilaafyada, si xal loogu helo muran kastoo ka dhashay fasiraadda Heshiiska.

3. Farsamada Xalinta Khilaafyada waxaa loo dejin doonaa, hab lifaaqyo ah oo u dhexeeya Dowlaha Xubnaha ah.

## Qodobka 58
## Saxiixyada, Meel marinta iyo Ka-mid noqoshada

Heshiiskani wuxuu u furan yahay saxiixa, meel marinta iyo inay ka mid noqoshada Dowladaha Xubnaha ka ah IGAD si waafaqsan habraacyada dastuuriga ah ee ay leeyihiin inay u maraan.

## Qodobka 59
## Dhaqan galka

1. Heshiisku wuxuu ku dhaqan geliyaa lixdan maalmood kaddib marka lagu wareejiyo Xoghayaha Fulinta iyadoo ay meel marinayeen saddex meelood oo laba meel Dowladaha Xubnaha ka ah IGAD.

2. Markuu dhaqan galo Heshiisku, Heshiiskii 1996 ee lagu dhisay Urur Goboleedka Horumarinta (IGAD) waa la hakinaya, mana noqonaayo sharci lagu dhaqmo.

3. Marka uu dhaqan galo, Dowlad kasta oo xubin ahi wuxuu geli karaa heshiiska markuu waafajiyo hab raaciisa sharci ee gudaha.

## Qodobka 60
## Kaydinta iyo Diiwaangelinta

1. Heshiiska iyo dhammaan agabkiisa saxiixa, meel marin iyo ku biiris, waxaa kaydin doona Xog-hayaha Fulinta, kaasoo u gudbinaya nuqullo ka mid ah oo saxiixan dhammaan Dowladaha Xubnaha ka ah.

2. Xog-hayaha Fulinta wuxuu ka diiwaan gelinayaa Heshiiska Midowga Afrika, Qaramada Midoobay iyo hay'adaha kale sida hadba Golaha go'amiyaan.

## Qodobka 61
## Muddada Heshiisku jirayo

Heshiisku wuxuu ahaan doonaa mid rasmi ah ilaa ay baabi'iyaan Fadhiga Guud keddib soojeedinta Golaha.

## Qodobka 62
## Kaydinta Xeerarka

1. Iyadoo la raacayo qodobada Heshiiska, hawlaha hay'adaha IGAD, marka uu heshiiskaani dhaqan galo kaddib, ma saamayn doono dhaqan galkaas, laakiin habraacyada iyo farsamooyinka kale ee sharci ee lagu maamulayo waa in lagu saleeyaa wax ka beddelka, la qabsadaa, lagu cadeeyaa, waana in la waafajiya Heshiiska sida ay hadba lagama maarmaanka u tahay.

2. Baabi'in, beddelidda ama wax ka bedelidda lagu sameeyey Heshiiska lagu dhisay Urur Goboleedka Horumarinta (IGAD) ma saamaynayo go'aamada Fadhiga Guud, Golaha, waaxyaha iyo hay'adaha kale ee IGAD, balse waa in go'aammadaas lagu dhaqmaa, laguna dhaqaa, iyadoo la raacayo wax ka beddelka, meel marinta, cadaymaha iyo waxa laga reebayo, hadba sida loogu baahan yahay waa in la waafajiyaa Heshiiska.

## Qodobka 63
## Saxiixa

Nuqullada English, French iyo Arabic si isku mid ah ayaa lagu saxiixay…Djibouti……4tii …... Juun, 2023

**AYAGOO RUMEYSAN** ayay saxiixayaasha hoos ku xusan ku lifaaqeen saxiixooda halkaan.

Mudane Ismaaciil Cumar Geelle
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti

Mudane Dr. Abiy Axmed
Ra'iisul Wasaaraha Jamhuuriyadda Federaalka Dimuqraadiga Itoobiya

Mudane Ato Isaias Afwerki
Madaxweynaha Dowladda Eritrea

Mudane Dr. William Samoei Ruto
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Kenya

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Mudane Salva Kiir Mayardit
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Koonfur Suudaan

Mudane Janaraal Abdel Fattah al-Burhan
Hoggaamiyaha Dowladda Jamhuuiryadda Suudaan

Mudane Yoweri Kaguga Museveni
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Uganda